Aqoon la´aantu waxa ay abuurtaa danbiyo

MALA AWAAL mise XAQIIQOOYIN

- “Waa la ogol yahay in la haysto gabal yar oo hashiishad ah ama darooga ah haddii shakhsiyan loo isticmaalayo”
- Maya: wax kasta oo ah haysashada waxyaalaha maan- dooriyayaasha ahi waa sharci daro, waxaana qofka lagu qabto ugu yaraan lagu ciqaabayaa ganaax.
- “Waa in iskool aad dhigataa ugu yaraan 9 sanadood”.
- Haa: Denmark waxa ka jirta waxbarasho waajib ah ilaa laga gaadhayo fasalka 9aad.
- “ Waa la ogol yahay in sariirta la isla tago, haddii la yahay 13-14 sano”
- Maya: Da´da ogolaanshaha galmadu waa 15 jir, Sidaa daraadeed lama ogola in sariirta la isla tago. Haddii labada qof midkood 15 sano ka weyn yahay – waxa markaa qofka lagu ciqaabi karaa xabsi dhan ilaa 8 sanadood.
- “Ma aha wax la isku ciqaabi karo, haddii dad kale internet-ka/ chat-ka looga geysto hanjabaad”.
- Haa way tahay: Waa xeerka ciqaabta oo lagu xadgudbay.Waxana la isku ciqaabi karaa ganaax ama xadhig dhan ilaa 2 sanadood.
- “Ma jirin cid dishay ama haraatiday isaga – Waxa aanu ka qaadanay uun taleefankiisii gacanta - May ahayn dhac”.
- Haa way tahay: Haddii wax lagu soo qaato ama cid kale loogu soo qaado iyada oo la iscimaalayo rabshad, ama lagu hanjabo waxyeelo iyo rabasho ama wax keenaya cabsi oo waxaa la mid ah, markaa qofka waxa lagu ciqaabayaa in uu geystay DhAC, iyada oo ay suurtogal tahay in lagu geeyo xabsi dhan 6 sanadood.

KA FEKER!! WAA MUSTAQBALKAAGIIYE!!

LAGA BILAABO QIYAASTII 8 jir

- Ilmaha/qofka dhalinyarta ah waxa lagu xukumi karaa in uu bxiyo magdhaw .
- Hooyada iyo aabuhu waxa ay bixinayaan ilaa 7.500 karoone. inta hadhayna qofka dhalinyarta ah.
- Shuruudaha magdhawgu waxa ay socon karaan 20 sanadood – Waana la dheerayn karaa.

13 SANO

- Waxa aad heli kartaa shaqo ah qaybinta wargeysyada.
- Waxa aad bogaga internetka ee lagu sheekaysto ka samaysan kartaa magac.

15 SANO

- Da´ada ogolaanshaha dembi ku oogista.
- Waa lagu dacwayn karaa, waana lagu ciqaabi karaa.
- Warqada cadaynta diiwaan gelinta danbiyada waxa lagu daabici karaa saxeexa waalidka/masuulka.
- Waxa aad ka shaqayn kartaa dukaamada.
- Da´da ogolaanshana galmada.

16 SANO

- Waxa aad qaadan kartaa liisanka wadista dhug-dhuglayda.
- Waxa aad iibsan kartaa biirka iyo khamriga uu alkolkiisu ugu badnaan yahay 16,4 %.
- Waxa aad maqal haye ka noqon kartaa dukaan.
- Waxa aad ciyaari kartaa Oddset iyo ciyaaraha la midka ah.

18 SANO

- Waxa laguu arkaa in aad tahay qof weyn.

- Waxa aad helaysaa xaqa codaynta.
- Waxa aad qaadan kartaa liisanka wadista gawaadhida iyo mootooyinka.
- Waxa aad iibsan kartaa khamriga adag. (alkoolkiisu ka sareeyo 16,4 %.)
- Waxa aad iibsan kartaa sigaarka iyo tubaakada.
- Waxa aad si sharci ah u iibsan kartaa hub aan run ahayn(softgun).

SHARCIYADA HABKA-SAN EE SHEEKAYSIGA INTERNETKA (CHAT-KA)

- Xad dejiso
- Weligaa saaxiib aad isku barateen bogaga sheekaysiga keligaa hala kulmin.
- Ha bixin macluumaadka shakhsiga ah.
- Dareen ka muuji oo keydi cadaymaha hanjabaadaha iyo wixii la mid ah.
- Qof aad ku kalsoon tahay la hadal haddii aad badbaado darro dareemayso ama aad baqanayso.

XASUUSO

- Hanjabaadaha lagu gudbiyo fariimaha qoraalka ah, face- buuga iyo wixii la mid ah, waxa ay keeni karaan ciqaab ganaax ah iyo/ama xukun shuruudi ku xidhan tahay.
- Fariimaha qoraalka ah iyo sheekaysiga internetka lagama arki karo luqada jidhka.
- Internetka wixii la galiyo lama kaantarooli karo.
- Wax waliba sida ay u eg yihiin ama la moodayo ma aha
- “facerape”, oo ah in si khaldan loo isticmaalo qof kale magiciisa, waxa la isku ciqaabi karaa ganaax iyo xadhig shuruud la´aan ah.

www.sikkerchat.dk

XASUUSNOW :

Magdhaw bixinta waajibka ah:

- Haddii ilmo ama qof dhalinyaro ah uu wax kharibo/jajabiyo waalidka iyo ilmuhu waxa ay bixin doonaan magdhaw .

MARKA SIDAA DARAADEED

- Waalidka waxa lagu xukumi karaa in ay bixiyaan ganaax dhan ilaa 7.500. ilmahana /qofka dhalinyarada ahna isaga ayaa inta kale bixinaya. Tusaale ahaan, haddii uu qofka yari wax kharibo oo xisaabtiisu ay noqoto 50.000 karoone, markaa waalidku waxa uu bixinayaa 7.500 , qof yarna 42.500 ayuu bixinayaa. Waajibka magdhaw bixintan oo kale waxa ay jiri kartaa 20 sanadood oo waana la dheerayn karaa.

Ganaaxyada nolol- maalmeedka.

- Taleefanka gacanta la isticmaalayo iyadoo baaskiil lawado – 1.000 karoone
- Taleefanka gacanta la isticmaalayo iyadoo la wado mootada -1500 karoone

DIIWAAN GELINTA DENBIYADA

A. Ganaaxyada lagu jaray ku xadgudubka xeerka ciqaabtu waxa ay diiwaanka ku dhignaanayaan 2 sanadood.
Tusaale ahaan: Dukaan xadis, xatooyo fudud, wax kharibista/jajabinta, hanjabaadaha.

B. Xukunka xadhiga ah ee shuruudu ku xidhan tahay, waxa uu diiwaanka ku dhignaanayaa 3 sanadood.

Tusaale ahaan: Dab dhalin(iyada oo aan naf halis la gelin), rabshadaha, Jabsashada, hanjabaadaha culculus.

C. Xukunka xadhiga ah ee aan shuruudu ku xidhnayn, waxa uu diiwaanka ku dhignaanayaa 5 sanadood.
Tusaale ahaan: Dab dhalinta (iyada oo naf halis la geliyey), rabshadaha waaweyn, dhaca.

D. Ganaaxyada lagu bixiyo sharciga gaadiidka iyo sharciyada gaarka ah, laguma dhigo diiwaanka denbiyada.
Tusaale ahaan: Sharciga hubka (I. xadgudubka = 5.000 oo ganaaxa)
Haysashada haashka/nacasta (I. xadgudubka = 2.000 oo ganaax ah,
2. xadgudubka =3000 ganaax ah, 3. xadgudubka = 4000 ganaax ah).

Dhalinyarada 15-18 jirka ah waa laga dhaafaa in lagu calaamadiyo warqada cadaynta dembi gelista, marka ugu horaysa ee lagu qabto dukaan xadis ama wax kale oo aan ahayn denbiyada waaweyn ee la isku ganaaxo ama la isku geeyo xadhiga ay shuruudu ku xidhan tahay. Laakiin si kastaba ha ahaatee waa in la bixiyaa magdhawga ku cad qaybta c.

Haddii uu qofka dhalinyarada ahi uu 3 sanadood gudahood, kadib markii uu go´aanku dhacay uu haddana dembi kale galo, labada xukunba waa lagu qaadayaa, oo waxana lagu dhigayaa warqada cadaynta denbi gelista.